

Wakiilnimada iyo waalinimadu waxay go'aano beddelaadeed oo lagu beddelo dadka aan awoodin inay sameeyaan ana xidhiidhiyaan go'aano mas'uula. Marka uu qof gaadho da'da siddeed-iyo-toban, sharci ahaan waa qof weyn oo leh xuquuq buuxda iyada oo aan la eegay laxaad la'aantiisa. Hase ahaatee, haddii ay u baahdaan gargaar go'aan qaadasho, hab beddelaad ama wax halkiisa gala ayaa laga yaabaa in loo baahdo.

Ikhtiyaadrka Baddalka ee Wakiilnimada iyo/ama Waalinimada

Wakiilnimada iyo waalinimadu waxa lagu tiriyaa ikhtiyaarada ugu adadag go'aan ka-gaaristooda. Ikhtiyaarada ka dabacsan ee horta la tixgelin karo waxa ka mida, aan se ku koobnayn: kormeerka aan rasmiga ahayn, xisaabta bangiga ee wadajirka, amarada daryeelka caafimaadka, awoodda wakiinimo ee dhaqaale, wakiilk-sharci ee hanti iyo wakiilnimada bixinta.

Wakiilnimada

Wakiilnimadu waa la in tixgeliyaa marka qofku aanu awoodi karin inuu fahmo, sameeyo, ama/iyo ku xiriirtimo go'aano gof-ahaaneed oo xilkasa, oo aanay ikhtiyaarada ka dabcsani waxba ka qaban karin. Waxa jira wakiilnimo xaddidan iyo mid dhan labadaba. Wakiilnimada xaddidan waxay siisaa wakiilka awoodda sharci ee uu ku gaari karo go'aano qaybaha nolosha qaarkood ee qofka. Wakiilnimada dhan waxay siisaa wakiilka awoodda sharci ee uu ku gaari karo go'aano qaybaha nolosha dhammantood ee qofka. Awoodda sharci ee wakiilka waxa ka mida:

1. Go'aansiga meesha uu ku noolaanayo
2. Daryeel, raaxada iyo hagaajinta (baahida guri, cunto iyo marrinada adeegyada)
3. Daryeel xikasa ee alaabta qofka (dharka iyo agabka)
4. Caafimaadka ama daryeel kale oo xirfadaysan
5. Ogolaanshaha ama xejinta heshiisyada
6. Awooda kormeerka
7. Helitaanka dheefta dawladda

Dadka hoos yimaad wakiilka waxa la yiraahdaa la-ilaaliye "wards." Iyada oo ku xiran awoodda la siiyey, wakiiladu waxa go'aan samayn karaan iyaga oo matalaya la-ilaaliyaha. Waxay go'aan ka gaari karaan meesha uu ku noolaanayo la-ilaaliyuhu, go'aanada caafimaadka iyo/ama hubinta in qofkaas si fiican loo daryeelo. Wakiiladu waa inay u keenaan maxkamaddii degmada warbixino ee wakiilnimada lagu bixiyey sannad kasta.

Waalnimada

Waalnimada waxa hela dadka aan awoodin in ay ka xiriirtamaan si xilkasnimo ah go'aanada dhaqaalaha. Dadka hoo yimaad waalinimada waxa la yiraahdaa dadka la-dhawro "protected persons."

Waaliyadu waxay go'aan dhaqaale u gaaraan qofka la dhawro. Waxay mas'uul ka noqon karaan bixinta biilasha, maalgalinta hantida, iyo hawlaha kale ee dhaqaalaha. Waaliyada waa inay siiyaan xisaab-xidh sannad kasta maxkamadda degmada ee waaliga lagu abuuray.

Sidee wakiilnimada iyo waalinimada loo abuuray?

Wakiilnimada iyo waalinimada waa hab xeer oo lagu maamulo degmada maxkamadda. Si loo abuurto wakiilnimada iyo waalinimada, dalab ayaa laga buuxiyaa maxkamadda degmada meesha la-ilaaliyaha iyo la-dhawruhu ku nool yihiin. Kadib dalabka marka la buuxiyo, dhagaysi ayaa la qabtaa uu xaakimku ku go'aamiyo haddii qofku u baahan yahay wakiil iyo/ama waali in la abuurto. Habkaasi wuxu u baahan yahay qofka buuxiyey dalabka inuu keeno caddaymo in aanu qofku awoodin sameeyo ama xiriiriyo si xilkasnimo ah go'aano oo aanu buuxin karin baahiyihiisa qof ahaaneed.

Wixii macluamad dheeraada ama adeegyada u-doodidda, kala-xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.

Dhokomentigani ma aha talo sharciya, oo yaan sidaad loo qaadan. Taas darteed, macluumaaka halkan ku qorani ma beddeli karaan talo wax-ku-oola oo qareen. Xarunta Xeerka Laxaad La'aanta ee Minnesota waxa lagala xiriiri karaa (612) 334-5970.